Federal Government of Somali

Ministry of Finance

SOMALIA CAPACITY ADVANCEMENT, LIVELIHOODS AND ENTREPRENEURSHIP,

THROUGH DIGITAL UPLIFT PROGRAM

SCALED-UP- P168115

# Wayddiimaha Joogtada ah ee Hannaanka Xallinta Cabashada ee Gargaara

**Wayddiin 1. Waa maxay Hannaanka Xallinta Cabashada?**

Warcelin.

Hannaanka xallinta cabashada waa mid furan oo loo dhan yahay, kaas oo leh geedi-socod iyo habraac lagula dhaqmo tabashooyinka, laguna fududeeyo waqti munaasab ku ah xalka cabashada ka dhasha mashruuca.

**Wayddiin 2. Kuma ayaa cabasho soo gudbin kara?**

Warcelin.

Cabashada waxaa soo jeedin kara daneeyayaasha mashruuca SCALED-UP oo ay ku jiraan qof ama shirkad kasta oo ay saamaysay hawlaha mashruuca. Daneeyayaasha waxaa ka mid ah shaqaalaha mashruuca, adeegbixiyaha aasaasiga ah iyo kuwa aan asaasiga ahayn, hay'adaha maaliyadeed, ganacsatada, beeralayda, dadka loo awood sheegto iyo kuwa danyarta ah.

**Wayddiin 3. Goortee ayuu qof soo gudbin karaa cabasho?**

Warcelin.

Cabashada waxaa la soo gudbin karaa xilli kasta inta uu mashruucu socdo. Iyada oo ay sidaa tahay, haddana, waxaa la dhiirrigelinayaa in qofka uu soo gudbiyo sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah marka ay la soo gudboonaato xaalad tabasho mudan.

**Wayddiin 4. Gudbinta cabashada ma waxay ku xiran tahay waqti gaar ah?**

Warcelin.

Cabashadu ma aha mid ku xaddidan inta uu socdo mashruuca, si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inay noqoto mid aan waxtar lahayn haddii ay qaadato waqti dheer in la soo gudbiyo.

Waxaa lagu talinayaa in sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah loo soo gudbiyo cabashada si arrinta wax looga qabto oo xal waara oo suurtagal ah looga gaaro.

**Wayddiin 5. Sidee buu qofku cabasho u soo gudbin karaa?**

Warcelin.

Tabashooyinka waxaa lagu soo gudbin karaa mid ka mid ah ama dhammaan wadiiqooyinka soo socda:

- Qof ahaan ugu soo gudbi tabasho qoraal ah xafiiska waaxda fulinta mashruuca (PIU) ee ku dhexyaal Wasaaradda Maaliyadda.
- Ku dir tabashooyinka email ka xallinta cabashada grm.scaledup@piu.mof.gov.so ama wac lambarka gaaban ee bilaashka ah **266**
- Ku rid warqadda cabashada sanduuqa loogu talo galay tabashooyinka ee yaal xafiiska waaxda fulinta mashruuca.

**Wayddiin 6. Ma jiraa hab gaar ah oo loo soo gudbiyo cabashada?**

Warcelin.

Cabashada waxaa loo soo gudbin karaa qaab kasta. Ma jiro habraac ama qaab gooni ah oo loo qoro marka la xaraynayo cabasho. Si kastaba ha noqotee, qofka cabashada guddoomaya ayaa looga baahan yahay in uu caddeeyo habraacyada.

**Wayddiin 7. Maxaa ka mid ah waxyaabaha uu qof cabasho ka gudbin karo?**

Warcelin.

Cabashooyinka waxay noqon karaan waxyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin, caddaalad darro iyo shaqo ka cayrin, mushahar xumo, musuqmaasuq ka dhasha socodsiinta mashruuca, saamaynta taban ee hawlaha mashruuca ku keeni karaan deegaanka iyo bulshada, takoorid ama tallaabo maamul oo aan caddaalad ahayn, diidmo maalgelin oo aan caddayn oo ku aaddan lahayn, xadgudub galmo, iyo xadgudubyada ku salaysan jinsiga.

**Wayddiin 8. Yaa mas'uul ka ah wax ka qabashada cabashooyinka?**

Warcelin.

Cabashooyinka waxaa loo gudbiyaa waaxda fulinta mashruuca oo leh guddi u xilsaaran cabashooyinka si ay uga hawlgalaan tabashada xalna uga gaaraan.

**Wayddiin 9. Sidee cabashada loo diiwaangeliyaa?**

Warcelin.

Waaxda fulinta mashruuca waxa ay leedahay nidaam qeexan oo ay ku hesho, kuna diwaangeliso cabashada iyo wakhti go'an oo ay ku jawaabto. Cabashooyinka waxaa loola dhaqmaa si qarsoodi ah, waxaana loo qiimeeyaa si dhexdhexaad ah, waxaana loo xalliyaa si hufan.

**Wayddiin 10. Waa maxay habka loo gudbin kara cabashada?**

Warcelin.

Cabasho kasta oo timaaddo waxaa loo mari doonaa habka soo socda:

Tallaabada 1aad: Wadiiqooyinka loo marayo tabashada

Cidda dhibban waxay soo gudbin doontaa tabasho, waxayna ku soo gudbin doontaa wadiiqooyinka loo maro cabashooyinka iyada oo la isticmaalayo luqadda Soomaaliga ama Ingiriisiga.

Ka dib marka la helo cabashada waaxda fulinta ee mashruuca waxa ay dib-u-eegis ku samayn doontaa dhammaystirnaanta cabashada.

Tallaabada 2aad: Kala saarid iyo habayn

Waaxda fulinta mashruuca ayaa ku qiimayn doona nooca cabashada laba (2) maalmood gudahooda si ay u go'aamiyaan in arrintu dhab tahay iyo in kale. Haddii cabashada loo arko in aysan buuxin shuuradaha, waa la diidi doonaa. Waaxda fulinta mashruuca ayaa go'aamin doona haddii arrinta si degdeg ah loo xallin karo ama haddii ay u baahan tahay baaritaan dheeraad ah in lagu sameeyo.

Tallaabada 3aad: Aqoonsi iyo dabagal

Waaxda fulinta mashruuca waxa ay diyaarinaysaa ka dibna siinaysaa qofka tabashada qaba qoraal caddayn ah oo Af-soomaali ama Ingiriisi ku qoran.

Tallaabada 4aad: Xaqiijin, baaris, iyo tallaabo dib-u-habayn

- Guddiga xallinta cabashooyinka ee waaxda fulinta mashruuca ayaa baari doona tabashada, qiimeynta waaxda fulinta mashruuca iyo xaqiiqooyinka la xiriira tabashada la soo gudbiyay.
- Guddiga ayaa si toos ah u gudbin doona go’aanka ama waxaa loo sii marsiin karaa adeeg bixiyaha xadgudubyada ka dhanka ah galmada. Haddii loo arko in ay ku habboon tahay waxa la isticmaali karaa habka dhaqanka iyo caadooyinka ee xallinta khilaafaadka.

- Haddii xal lagu gaari waayo habka xallinta cabashada, SCALED-UP waxay siin doontaa qofka cabanaya xulashooyin iyo habraac rafcaan. Tani waxay dacwada gaarsiin doontaa in loo gudbiyo maxkamadaha sharciga u leh.

**Wayddiin 11. Waa maxay waqtiga xaddidan ee xillinta cabashada?**

Warcelin.

Dhammaan cabashooyinka waxaa wax looga qabanayaa oo loo xallinayaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah si loo soo gaabiyo waqtiga xal ka gaarista una noqdo mid macquul ah. Kiisaska fudud arrinta waxaa lagu xallin doonaa shan (5) maalmood gudahood marka baaritaannada la dhammeeyo. Xaaladaha adag, xal ka gaarista waxa ay qaadan doontaa ilaa 20 maalmood si loo dhammeeyo.

**Wayddiin 12. Xadgudubyada ku salaysan jinsiga ma lagu soo gudbin karaa hannaanka xallinta cabashada?**

Warcelin.

Haa. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ay ugu wacan tahay dabeecadooda xasaasiga ah iyo dhowridda xogta shakhsiga, kiisaska xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga waxaa loo soo gudbin doonaa adeeg bixiyayaasha loo qoondeeyay in ay guddoomaan cabashooyinka la xiriira xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga ee mashruuca la xiriira. Bixiyeyaasha adeegyada xadgudubyada ka dhanka ah galmada waxa ay bixiyaan adeegyo dhowr ah oo ay ku jiraan meelo la-talin tiiraanyo-bixin, taageero kasmo-nafeed, iyo adeegyo caafimaad.

**Wayddiin 13. Goorma ayaa la soo gudbin karaa ashtako ka dhan ah xadgudub galmo?**

Warcelin.

- Waxaa lagu talinayaa in la gudbiyo ashtakada la xiriita xadgudubka jinsiga isla marka uu shilku dhaco ama (30) soddon maalmood gudahooda laga bilaabo marka uu dhaco falka laga ashtakoonayo ama cabanayo. Haddii kale, ashtakada waxaa la xerayn karaa 15 maalmood ka dib muddada 30-ka maalmood ah ee la cayimay, waase in ay jiraan sababo ku filan oo caddaynaya daahinta.

**Wayddiin 14. Ma jiraan qaabab lagu soo gudbiyo cabashooyinka marka la joogo heer Dowladda Federaalka ah iyo Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka?**

Warcelin.

- Hawl fuliyeyaasha waxay ka sameeyeen xarumaha wasaaradaha iyo hay’adaha ay khusayso hab gaar ah oo aan caqabd lahayn oo dhaqan ahaan ku habboon, anshax leh,

xafidaya sirta iyo arrimaha xasaasiga ah ee jinsiga. hababkaas waxay kala yihiin in qofka dhibanaha ah uu imaan karo xarunta si wada-hadal gaar ah loola yeesho, waxaa kale oo uu isticmaali karaa qadka isgaarsiinta ee bilaashka ah, fariin qoraal, email ama waraaqda cabashada in uu soo gudbiyo.

- Sida ugu dhaqsiyaha badan, dadweynaha ayaa lala wadaagi doonaa goobaha wasaaradaha ay khusayso ee dowladaha xubinta ka ah dowladda federaalka.

**Wayddiin 15. Qof racfaan ma ka qaadan karaa go'aamada guddiga xallinta cabashada?**

Warcelin.

Kadib marka ay go'aankooda gaaraan, guddiga waxa ay qofka tabanaya ku wargelin doonaan wadiiqooyinka uu raaci karo haddii uu rafcaan rabo in uu qaato. Intaa waxaa dheer, qofka tabashada qaba waxa uu mari karaa hannaanka maxkamadaha ee rasmiga ah.